

Su'aalaha caamka ah ee talaalada COVID-19



Waa maxay saamaynta caafimaad darada kale ee talaalada COVID-19?

Waa caam in dadku ay yeeshaan astaamo yar ama dhexe ama saamayn caafimaad daro kale kadib marka ay is talaalaan. Astaamaha dhexe ama yar waxaa kamid ah waxyabaha sida xumad ama casaan meesha la iska mudo. Ma jirto sabab looga warworo hadii la yeesho astaamo yar ama dhexe dhawr maalmood kadib marka la qaato talaalka. Tani waxay ka dhigan tahay in jirkaaga difaaciisu uu shaqaynayo oo uu ka jawaabayoo oo uu baranayo la dagaalanka xanuunka.



Waa intee kharashka talaalka COVID-19?

Talaalka COVID-19 ee lagu iibsaday lacagta cashuur bixiyayaasha waxaa cid walba lagu siinayaa bilaash. Hadii aad leedahay caymis, bixiyayaasha talaalku waxay ku dalacan karaan kharashka caymiska bixintiisa, ama kharashka bixinta, talaalka. Laakiin cidna maaha in loo diido talaalka hadii ayna awoodi karin.

Ma inaan haystaa dhalashada Maraykanka, deganaanshe Maraykan ah, ama fiise si aan u qaato talaalka?

Maya. Xaaladaada soo galaytigu kaama hor joogsanayso inaad qaadato talaalka. Macluumaadkaaga shakhsii ahaaneed waa sir oo waxaa ilaaliyay sharciga. Hadii aad ku jirto mid kamid ah kooxaha ku jira khatarta isla markaba is talaal, la xidhiidh bixiyayaasha ama waaxda caafimaadka deegaankaaga wixii macluumaad dheeraad ah. Waxa lagaaga baahan karaa cadayn inaad ka shaqayso meeshaas, sida aqoonsigaaga shaqada.





Ma waxa aan u baahanahay aqoonsi si aan isku talaalo?

Bixiyayaasha talaalka qaar waxa ay kaliya kaa dalban doonaan inaad tusto iimeelka xaqijintaa ad heshay markii aad isku duwaan gelisay balanta talaalka, laakiin bixiyayaal kale ayaa kaa dalban kara inaad tusto aqoonsi sawir leh balantaada.

Waxa aanu kaliya u isticmaali doonaa macluumaadkaaga shakhsii ahaaneed

2 shay:


- 1 Si loo xaqijiyo inaad gaadhay da'dii loo ogolaa in la talaalo.
- 2 Si loo xaqijiyo in aanu talaalayno qofka saxda ah. Waa in aanu xaqijinaa in magaca qofka la talaalayaa uu lamid yahay magaca qofka balanta ku qoran. Waa aad u baahan doontaa xadiga 2aad dhawr todobaad kadib marka aad qaadato ka kowaad. Dhamaan waraaquhu waa inay is yeeshaan si markaa aanu u xaqijin karno inayna jirin wax mushkilad ah marka aad qaadato xadiga 2aad.



Lama wadaagayno macluumaadkaaga sharci fulinta ama saraakiisha laanta socdaalka.

Waxa aad isticmaali kartaa noocyada kala duwan ee aqoonsiga sawirka leh ah bixiyayaasha talaalka intooda badan. Waa ay kaliya u baahan yihiin aqoonsi leh sawir, magaca iyo taariikhda dhalashada. Waxay noqonaysaa inaad soo qaadato nooc kale oo cadayn ah oo muujinaya inaad degan tahay degmada, sida biilashada gaasta ama biyaha/laydhka, hadii aqoonsigaaga aanu ku qornay cinwaankaagu. Waydii waaxda caafimaadka deegaankaaga ama bixiyaha talaalka hadii aad qabto wax su'aalo ah.

Hadii aad talaalka ku qaadanayo cidda aad u shaqayso, waxay noqonaysaa inaad tusto cadaynta inaad ka shaqayso halkaas, sida aqoonsiga shaqada.



Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan COVID-19, talaalada COVID-19 ama goorta iyo halka aad iska talaalayso, boooqo <https://coronavirus.utah.gov/>.

Waxa aad iska duwaan gelin kartaa websaytka si aad u hesho macluumaadka ugu danbeeyaa marka macluumaadka talaalka ee cusub uu diyaar noqdo.

Hadii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan COVID-19 ama talaalada, la hadal khadka tooska ah ee COVID-19 ee **385-273-7878**. Khadka tooska ah waxa diyaar ku ah xirfadlayaal caafimaad oo naxariis badan oo kaaga jawaabi kara su'aalaha aad qabto iyo wixii khayraad ah ee kugu dhaw.

Waxaa lagu heli karaa 24/7 wax ka badan 100 luuqadood.